# TUSAHA AXKAAMTA

## XAJKA IYO CIMRADA

دليل الحج والعمرة باللّغة الصوماليــة العمرةُ الى العمرة كفارةٌ لمابينـهماوالحجُّ المَبْرُورُ ليس له جزاءٌ الاالجنةُ



1427-1-3 الموافق 2006-2-1

Waxa qoray sh.Ibraahiim maxamuud jiisoow
(sh. Jiisoow) Tell: 615591213.
تأليف الشيخ إبراهيم محمود جيْسَوالصومالي المقدشي

حقوق الطبع محفوظة للمؤلف

# دليل الحجّ باللّغة الصّومالية

# TUSAHA XAJKA IYO CIMRADA

بسم الله الرّحمن الرّحيم

الحديث :مَنْ حَجَّ لله فلم يَرْفَثْ ولم يَفْسُقْ رجع كيوم ولدته أمه

**Risaaladaan** waxaan ugu talagalay inaan ugahadlo axkaamta xajka iyo cimrada sida, shuruudaha, arkaanta waajibaadka sunooyinka iyo wixii xajka laxiriira iyo wixii xaajiga iyo muctamirka ka xaaraam ah inta ay xarmanyihiin waxaan ugu talagalay, xujeeyda soomaalida ah in aykafaa'iideestaan.sanadwalba.maadaama aan soomaali ku qoray.

**Risaaladaan** waxaan u qoray Alladartii iyo inaa ku moodo maalin aysan dadka anfaceyn,maal iyo wiilal Risaaladaan **Waxaa qoray**: **Sh**. **Ibraahiim Maxamuud Jiisoow** (**sh**. **Jiisoow**) **Tell**:**5591213**

**XAJKA luqo** ahaan waxaa layiraa qasad sharci ahaana waxaa layiraa in beeytka Alle cibaado loola qasdo

**XAJKU** wuxuu kamid yahay tiirarka islaamka oo shanta ah,waana rugniga shanaad,

**XAJKA** waxaa la waajibiyay sanadkii lixaad ee hijriyada,

**XAJKA IYO CIMRADA** qofka muslimka ah cimrigiisa hal mar ayey ku waajibaan hadii shuruudi laga helo waxaana u daliil ah xadiiska rasuulka c.s.w markeey soo degtay aayadda 97aad ee suuratu, aala cimraan, ayey asxaabtu waxay, dheheen sanadkasta miyaa markaas ayuu rasuulku yiri MAYA hadii aan dhihi lahaa haa wuu idinku waajibi lahaa mana awoodeen markaas ayaa waxaa soodegtay aayada101aad ee suuratu Al Ma,ida taas oo Alla uga reebay asxaabta su,aasha badan

**RASUULKA** c.s.w.marki XAJKA lafaral yeelay kadib halmar ayuu xajiyay wuxuuna xajiyay

sanadkii 10aad ee hijriyada waxayna aheyd xajatul wadaac laakiin inta'aan lafaral yeelin xajka oo ahayd hijriyada kahor laba mar ayuu xajiyay wuxuuna cimreestay afar mar. **XAJKU** waxa uu leeyahay axkaamul khamsa,oo mar wuxuu noqdaa fardulceyn sida xajka kowaad ee qofka lagu leeyehay marna wuxuu noqdaa fardul kifaaya Sida inay, sanadwalba muslimiinta qaar kamid ah xajiyaan, si ay kacbada cibaado ugu nooleeyaan. Marna wuxuu noqdaa sunno, sida xajka caruurta iyo adoomada, Laakiin haddii carrurtu, qaangaaraan, adoomaduna xoroobaan waxaa lagarabaa xajki waajibka ahaa oo lagulahaa. Marna wuxuu noqdaa xaaraam sida marka lahubsado,indhibaatokaimaanayso safarka xajka marna wuxu noqdaa karaaho sida marka laga shakiyo in dhibaato kaimaanayso safarka Xajka

## FADLIGA XAJKA&CIMRADA

Rasuulku wuxuu yiri C.S.W qofka xajiyo oo aan xajkiisa wax fuxshi ah ku sameynin wuxuu xajkiisa kasoo noqdaa asagoo lamid ah maalintii hooyadiis dhashay

Waxaa kale oo rasuulka kasugnaatay C.S.W. inuu yiri cimro ilaa cimradeeda kale waxay danbi Dhaaf utahay danbigi udhaxeeyso labadaas cimro xajka lagu samafalayse jasadiisu(amaalmarintiisu) waa jano

العمرةُ الى العمرةِ كفارةٌ لما بينهما،والحج المبرورُ ليس له جزاءٌ الا الجنةُ

## FADLIGA MAALINTACARAFO:

**Rasuu**lka wuxuu yiri C.S.W majiro yoom kabadan in alle ka xoreeyo adoonka naarta maalinta 5Carafo5

## SHURUUDAHA XAJKU WAA TODDOBO

Islaanimo, Qaangaar, Caqli, Xornimo, Sahay, Gaadiid iyo Wadadu inay aamin tahay socodkuna suura galaayo oo :loola jeedo in marka hantidu ku soo gashay laga gaari

karo u diyaar garowga xajka sida inaad goosato Baasaboor oo aad fiisana hesho. XAJKA waxaa kaloo loo shardiyaa,awoodAwoodaas,oolookalaqaadayolabo.Awood,dhaqaale,iyo,Awoodxoogah.**Qofka**,**awoodadhaqaale** leh laakiin aan awooda xooga lahayn waxaa ku waajiba inuu kireesto qof usoo xajiyo asagooxataa gurigiisa jooga waxaana u dalii ah xadiiska Buqaari warinaayo oo ahaa in haween,ay utimid Rasuulka (s.c.w) ayna ku tiri Rasuulka faralka alla adoomadiisa ku faral yeelay wuxuu haleelay Aabahay oo duq ah daabadna kuma sugnaankaro ee maka xajiyaa Rasuulkuna wuxuu yiri nacam.

**CARUURTU** waalidkood weey uxajin karaan farqina kalama laha wiil iyo gabar, laakiin waxaa shardi ah in qofka qof kale ka xajinaayo in uu marka hore naftiisa kasoo xajiyo. QOFKA awooda dhaqaale iyo awooda xoog isku leh asiga ayay waajib ku tahay inuu soo xajiyo

## HAWEENKA WAXAA LOO SHARDIYAA MUXRIM

Ama ninkeeda sida ku cad xadiiska Rasuulka waxaakaloo loo baahanyahay in qofka xajinaayo uu ka xajiyo maal xalaal ah waxaa kale ooloo baahanyahay,inuu dardaaram qoro uu kaga hadlaayo waxa lagu leeyahay iyo wixii uu dad kuleeyahay waxa lagu leeyahay waxaa lolajeeda **DEEYNKA aan xaala aheeyn** (aan haddalagaarabin),laakiin haddii deynku (xaalo yahay)oo hadda laga rabo waa in uu iska bixiyo deeynka marka hore,kadibna wixii usoo hero haddeey xaj udhan yihiin uu ku xajiyo,haddii aysan xaj udhameeyna xaj kuma waajibin

## QOFKII KADHINTO HANTI

ayka,waajibtay in laga xajiyo.asiga oon walikaxajin hantidaas Waxaa ku waajib ah qofka dhaxalka iskaleh,inuu uga xajiyo hantidaas ileen deenka alla ayaa ku xaqnimo badan in lagudee,

sida ku cad xadiiska bukhaari uurasuulka,c,s, kuyiri, deenka alla ayaa ku xaqnimo badan in lagudo 468 مغني المحتاج في الجزءالأول رقم

laakiin qofkii kaxjinaayo qofkaas waxaa looshardiaas inuu isagu naftiisa marka hore xajki waajibka ahaay ka xajiyay.

**Qofki waalidkeed** **oo muslim ah joogo** waxaa loo suneeyaa ineey ka,idan qaadato xjka aadistiisa

**HAWEENKA LAQABO** xajkama ansaxaayo haddii uusan idmin ninkeedu maxaayeeelay ninka xaqa uuu haweenta kuleeyahay waa foori(degdeg) xajkuna waa taraakhi(dib) xajkaas ha ahaado faral ama suno laakiin salaada &soonku sidaama,aha maxaa yeelay waqtigooda ayaa gaaban oo ninku ku dhibtoomaayo (baajuuri nonbar 333)

## ARKAANTA XAJKU WAALIX

1. **Niyo maca ixraam ah**. istaaga carafo, dhawaafurugniga (ifaadaha), sacyiga xiirashada am gaabsashada

## RUGNIGA KOOWAAD

WAA XARMASHADA (Xarmasho macal niyo ah) Xajka waxaa la xarmada bilaha Xajka oo ah SHAWAAL (Soonfur), DUL-QACDA(sidataal) iyo tobanka maalmood ee Bisha carafo,uguhoreeyso laakiin qofki xarmado bilahaan waqti aan aheeyn Ixraaamkiisu wuxuu noqonayaa cimro kaliya maxaa yeelay cimrada sanadkoo dhan waa la cimreysan karaa waxaan a suno ah inuu marka horo qubaysto xirtana dharka cad-cad.hadduu nin rag ah yahay:Laakiin haweenka looma suneeyo in ay xirtaan dhar cadcad balse waxay qaadanayaan dhar astur ah, sida xijaabka kadibna laba ragco oo suno ah uu

dukado kadibna xirto xajka uuna yiraaho naweeytul xaja wal cumrata I.W.M haduu soomaaliya ka tago wuxuu ka soo xarmanayaa YALAMLAM laakiin hadii uu madiino ka imaanayo sida marka uu xajka ka hormariyo siyaarada Rasuulka qabriga (c.s.w.) wuxuu ka xarmanayaa dulxuleeyfa

## XAJKA WAXAA LOO XAJIYAA SADDAX NOOC

IFRAAD TAMATUC IYO QIRAAN Sadaxdaan midkI aad rabto ayaad xajinee waadna ku dhawaaqee ilayn Rasuulku wuu ku dhawaaqaye hadii aad xajinayso Ifraad waxaad leedahay naweeytul xaja ,wa axramtu,bihi,hadii aad xajinayso Tamatuc waxaa leedahay naweeytul xaja wal cumrata,wa axramtu bihi marki, aad xajinayso Qiraan waxaa leedahay sidii oo kale: haddii uuqofku qofkle ka xajinaayo

wuxuu leeyahay (naweeytul xaja canfulaanin) waxaa niyeestay inaan hebel kaxajiyo

**TAMATUC**:

Waxaa layiraahdaa in la hormariyo cimrada lagana hormarsho xajka inta aan lagaarin maalinta sideedaad oo aad xajka gali lahayd kadina markaad dhameysato cimrada waxaa kuubanaan waxkasto oo ixraamka dartii kaaga xaaraam ahaay oo ahaayeen,**tobanka**,**sheey**,ooaay,kamidtaha xaaskaaga oo aad utagto dharka ixraamka ooaad iska dhigto barafuunka ama wax carfaayo ooaad marsato I.W.M.sidaas ayaana loogu magaacaabay **TAMATUC** oo macnahiisu yahay RAAXEEYSI ileen wuxuu ku raaxeestay labadi cibaado dhexdoodee oo ixraamki lamataagnaan illaa xajki lagagaaraayee markaas kadib ayuu xaajigu xaj xarmanayaa maalinta sidedaad يوم التروية waxuuna helay markaas xaj iyo cimro waxaana

lagaa rabaa dhiig ama soon sida kucad aayada 196 aad,eesuuratul baqara

**HADABA XUJEEYDA** waxaa ufiican ineey mutamatic noqdaan ooay marka horaba mutamatic xirtaan oo (niyeestaan) maadaama rasuulku asxaabta kuyiri xajkiina ubadala cimro cimradu waxeey ku egtahay markuu xarmado uuna xirto cimrada dawaafana dawaaful cimro sacyinalayimaado,.xalqi(xiirasho.amagaabsasho uusameeyo halkaas ayeey ku egtahay cimradu kadib ayuu xaajigu xaj gelayaa maalinta sideedaad ee carafe waana marka aad xirato tamatuc amaqiraan

**Xusuus**:. Xaajiga ah Mutamatic haddii uu ka gudbo miiqaatka sida haddii aydiyaaradu ka gudbiso miiqaatka dabadeedna usoo noqdo miiqaadka kadibna uu xaj kasoo xirto,asiga oo aan acmaash xajka bilaabin wuu ka dhacayaa dhiigi laga rabay.ileen mukhaalifadi uusameeyay

wuu ka laabtee lakiin hadii uusan soo laaban uuna xajki sii wato dhiigi ayaa laga rabaa,laakiin xaajiga mutamatica ah haddii uu yahay dadka degan Masjidul xaraamka fidyo(dhiig ama soon) lagama rabo sida ku cad aayadda 196aad ee Suuratul baqara

## MULAAXADA (FIIROGAAR AH)

Sababta aan looga rabin dadka xaramka degan fidyada ee looga rabo dadka aafaaqda kayimid (korka Imaadka ah) waxay tahay dadka xaramka degan ayagu ma cimreeysanayaan bilaha xajka ooah soonfur sidataal iyo tobanka ugu horreeysa bisha carafo maxaayeelay ayagu xaramkia ayeey,degenyihiin oo jaanis ayeey heestaan oo sanadka intiisa kale ayeey iska cimreeystaan

maxaayeelay cimradu sanadka oodhan waa lacimreeysan karaa. fidyadana waxa keenayo waa bilaha xajka inta lacimreesto laxalaaloobo isla sanadkaasna laxajiyo wax kukalifaayana malaha arintaas fidyada keenaayo maadaama ay xaramki degenyihiin ayna cimreeysankaraan waqti aan aheeyn bilaha xajka laakiin dadka aan xaramka degeneeyn hadeeey mutamatic ama qiraan yihiin waxaa laga rabaa fidyo maadaama ay bilhi xajka cimreeysteen,ayna,xalaaloobeen(raaxeesteen) isla sanadkiina xajiyeen waana jaanis eey ka faa,iideesteen maadaama aysan ayagu xaramka degeneyn oo aay safar ku yimideen kana

faa,iideesteen jaaniskaas si eey uhelaan xaj iyo cimro waana ineey xirtaan mutamatic ama qiraan fidyana iska dhiibaan ama soomaan sida kucad aayada 96 aad ee suuratul baqara waana kaas farqiga udhaxeeyo dadka xarmka degen iyo dadka safarka kuyimid

والله أعلمُ بالصواب

## WAQTIGA:XOOLAHA,LAQALAAYO

wuxuukabilaabanayaa markey qoraxdu soobaxdo maalika tobanaad oolajoogo qadar ah inti salaada ciida laga dugado lagana aqriyo labadeedi qudbo wuxuuna baaqi ahaanayaa waqtiga xoola qalidu ilaaa iyo ayaamu tashriiqu ka dhamaadaan

**IFRAADKU**:waa kaliyeen xajka lakali yeelo markahorana,uukasooxarmado,miiqaatkiisa

kadibna marka uu xajka dhameysto uu soo cimreysto uuna cimrada kasooxarmado xiliga meesha ugu dhaw mrkuu kabaxo mako waxaana ugu fadli badan,meelahaas,JICRAANA:&TANCIIM& XUDEEYBIYA

**QIRAANKU**: waa in la xiriirsho xajka iyo cimrada waana inuu halmar labadaba wada xirto oowna isku xiriirsho uuna halmar layimaado acmaashii xajka ileen cimradina weey sooguda geleehe ee xaajigu niyo uun halayimaado

**QIRAAN** waxaaa loogu bixiyay wuxuu xiriiriyay acmaashii xajka &cimrada qofkii Qiraan xajinayo waxaa lagarabaa dhiig ama soon oo ah sida aan aan ku soo sheegnay tamatuca laakii dadka degan xaramka dhiig iyo soon lagama rabo sida ku cada aayada 196 ee suuratul baqara sababtana waan soosheegnay markuu

**Xusuus**:. waxaa la isku khilaafay, yaa ugu fadli badan sadax nooc, ee xajka loo xirto shaaficiyada iyo maalikiyadu waxay dheheen waxaa ugu fadlibadan, **IFRAADKA** waxeeyna daliilsadeen xadiiski bukhaaari oo caa,isho warieeysan nanbarka 4146 ayna tiri waxaa naga mid,ahaay mid cimro xarmaday (xirtay) waxaa naga mid,ahaay mid xaj xirtay waxaa naga mid,ahaay mid xaj iyo cimro xirtay rasuulkuse wuxuu xirtay xaj sidaa darted waxeey qaateen reer shaafici ficilka rasuulka c.s.w.ee xajatul wadaac waxaa kale aydhaheen shaaficiyadu mutamatci iyo qiraan waxaa laga rabaa dhiig ama soon laakiin ifraadka lagama rabo kabkuna wuxuu ku tusaa nuqsaan

**IMAAMU axmad** wuxuu yiri waxaa ugu fadli badan tamatuca wuxuu daliilsaday rasuulka c.s.w. oo asxaabta ku amray ineey tamatuc kadhigaan ooxajki ay wateen cimro ugediyaan markeey cimrada dhameestaana eey xajiyaan

wuxuuna fiiriyay imaamku amarka rasuulka c.s.w. laakiin nabigu c.s.w uma gedin xajki uu watay cimro maxaa yeeley hadyi ayuu watay hadyiguna magaarin waqti xalaaloowgiisa oo ah yoomka tobanaad markuu hadyiga goowraco ABUUXANIIFANA wuxuu yiri waxaa ugu fadli,badan,QIRAANKA marka uu xaajigu xajka xirto wuxuu dhahayaa
labayka laahuma labayk labayka laashariika laka labayk inal xamda wanicmata laka wal mulku laa shariika laka waana suno, kadibna wuxuu aadayaa maalinka sideedaad oo loo yaqaano yowmu-tarwiya oo ah maalinta biyo dhaamiska waxaana loogu bixiyay xujeyda oo biyaha xajka ayku isticmaalayaan dhaansan jiray waxeyna joogayaan maalintaas Muno waxeyna ku tukunayaan Duhur, Casir, Maqrib iyo Cisho iyo subax weyna gaabinayaan salaadaha, illeen waa musaafire,laakiin, subax iy maqrib lama

gaabiyo sidoodaba waxa lagaabiyo waa uun rubaaciyada (afareeyda) duhur,casiriyocisho Subaxda sagaalaadna waxey . aadayaan Carafo maalinta carafana salaadaha wxay kusameeynayaan taqdiim iyo ta,khiir weyna jamcinayaan oomarki duhur lagaaro waxeey dukanayaan duhur iyo casir jamcu taqdiim maqribka marka lagaarana wey dibdhigayaan (jamcu ta,khiir waxeeyna dukanayaaa marki cisho lagaaro waxeyna ku dukanayaan muzdalafa cishahana waalagaabinayaa

## 2. RUGNIGA LABAAD WAA WUQUUFUL CARAFA

`Carafa kuligeed waa mowqif oo meeshaad doonta ayaa ka istaagi kartaa waana maalinta sagaalaad ee bisha carafe waqtiga carafo waa laga bilaabo geeska suulka qoraxda maalinta carafo illaa salaada subax kadhalato habeenka tobanaad qofkii Carafo tagi waayo maalinka sagaalaad xaj uma jiro, imaamka ama naa'ibkiisu wuxuu

akhrinayaa labo khudbo maalinta Carafaat dabadeed wuxuu tujinayaa **dadka duhur iyo casir oo Jamacna ah Qasirna ah oo labo labo rakco laga tukanayo**. Xaajigu wxuu ku duceysanayaaCarafo dhexdeeda wuxuuna badaniyaa towxiidka, waxaana u daliil ah xadiiskii rasuulka (S.C.W.S) uu yiri: "duco waxaa ugu kheyrbadan ducada maalinta Carafa" waxaa kaloo uu yiri rasuulku (S.C.W.S): Waxa aan iri anigaiyo nabiyaashi,iga horeeyay waxaa ugu kheyr badan(Laa Ilaaha Illalaahu Waxdahu laa shariika lahu lahul mulku walahul xamdu wahawa calaa kuli shey'in qadiir),

مغني المحتاج في الجزءالأول رقم 497

waxaa kaloo xaajiga loo suneeyaa inuu saliga nabiga badiyomaalintaas. Laakiin fuulida buurta AL-RAXMA fadiila gooni ah malahan, sida Imaamu Nawaawi uu ku sheegay kitaabkiisa

Majmuuca ah.halkaasayaana ilimada lagu daadshaa danbiyadna looga tooba keenaa

هناك تُسْكبُ العَبَرَاتُ وتُقالُ لعَثَرَاتُ

Xaajiga carafa wuxuu ka tagayaa markii ay qoraxdu dhacdo, wuxuuna aadayaa Muzdalafa.

**XUSUUS** Qofka aan tagin carafa maalinta sagaalaad xaj uma jiryo waxayna sameeynee acmaashii cimrada ileen cimradu malaha wuquuf carafe;waxaaa kuwaajiba inuu soo qaleeyo xajkaas xataa hadii uu ahaay xajkaasu suno xaajiga markuu kabaxaayo carafo Maqribka wuu akhirayaa (dib ayuu u dhigayaa) si uu ugu dukado maqribka iyo cishahaba iyagoo jamac ah Muzdalafa markuu tago. Habeenkaas tobnaad ayuu dukanayaa maqribkii iyo ceshahaba ayagoo jamac ah maqribka wuxuu duganayaa seddex rakco ileen magrib iyo subax lamagaabshee cishahana wuxuu dukanayaa labo rakco **HAL AADAAM IYO LABA AQIM** ayuuna ku dukanayaa dhexdoodana lama suneeyo saalad

suno ah wuxuuna baryayaa (seexanayaa) Muzdalafa. Waxaa sunno ah in Haweenka iyo dadka tabarta daran ay sii baxaaan habeenka kala barkiisa markii la gaaro, ayna aadaan Muna baryida(hoyashada) muzdalafa iyo muno waxaa laga fasaxay dadkaxoolaha ilaalinayo waxaa loola jeedaa xoolihii laqali lahaa laakiin hadda doowladda sacuudiga ayaa dad shaqaala ah uyeeshay waxeeyna sii marayaan Mashcarul-xaraamka, sida ku cad ayaada 200aad ee suuratul BAQARA Waana buur ku taala meesha ugu danbeysa Muzdalafa oo la yiraahdo QUZAX, wayna dul istaagayaan, wayna ducaysanayaan illaa waagu ka iftiimo, iyagoo qaabilsan Qiblada, arintaasna waasunno. Intaakadib, Xujeydu waxay aadayaan Muno, markii qoraxdu soo baxdo kadib, qof kastana wuxuu tuuranayaa Buurta (**Jamratul kubraa**) waana midda soo xigto Masjidul-kheyf. Oo ugu sokeeyso marki aad katimaado Musdalifa xageeda uguna

xageeyso oo xigto Mako xageeda Maalintaas tobonaad, halkaas buur uunbaa tuureeysaa **HALKAAS AYEEYKU GOOYNAYAAN TALBIYADA**,**XUJEEYDU** wuxuuna ku tuurayaa buurta todobo dhagax, wuxuuna leeyahay markuu dhagaxa tuurayo ALLAAHU AKBAR.

**XUSUUS** Dhagada latuurayo xajka dhexdiisa dhamaantod waa 60 dhagax

**FIIROGAARAH**: ملاحظة

Waxaalayiri dhagaxa la.aqbalay waa lakoryeelaa ka aan la,aqbalina meesha ayaa looga tagaa.ooHaddi aaneey sidaa aheeyna weeyba buuxsami lahaayeen buuruhu

مغني المحتاج في الجزءالأول رقم 500

Intaa kadib, haddii uu yahay MUTAMATTIC ama QIRAAN, wuxuu qalayaa xoolihii kuwaajibay hadii uusan awoodina waxaa laga rabaa toban maalmood oo soon ah, soonku wuxuu ka soo bilaabahayaa maalinta lixaad ee

carafo si uu sagaalaadka u afurnaado ileen xaajiga looma suneeyo maalinta,sagaalaad soone:mana soomayo ayaamu tashriiqa ookala ah koow &tobanka laba iyo tobanka saddax &tobanka,illeensoonkoodu,waa,xaaraam,waxaa na,udaliilaxadiiska,rasuulka,C.S.W.uuna warinaayo Imaamu muslim uukuyiri Maalmaha ayaamu tashriiqu waa maalmo cunitaan &cabitaan iyo digriga ilaaheey saddaxdaas maalin uu soonkooda kasoo bilaabay maalinka lixaad wuxuu kusoomyaa xajka dhexdiisa

**XUSUUS**; Haddii xaaajigu,uusanku soomin saddaxdaas maalin xajka dhexdiisa wuu soo qaleeynayaa fidyana lagama rabo

مغني المحتاج في الجزءالأول رقم 517

todobada maalmoodna ee soo hartana wuxuu soomayaa markuu kusoo noqdo wadankiisa sida ku cad aayada 196aad suuratul BAQARA intaa kadib wuu xiiranayaa ama wuu gaabsanayaa. Waxaana ragga u fadli badan Xiirashada, intaa

kadib, xaajiga wuxuu la imaanayaa dhawaaful-ifaada ama dhawaafu-rukni, **XSUUS**: waxaa fadli badan indhawaaful ifaadaha lala yimaado yoomka tobanaad ee bisha carafo,barqaadiisa,laakiin dhamaad malaha oo ILaa cimrigaada waa la Imaan kartaa dabadeed sacyi ayuu la imaanayaa haddii uusan awal sacyi la imaanin markii uu la imaanayay dhawaaful-quduumka. Intaa kadib, wuxuu usoo noqonayaa hadana Muna.si uu ayaamu tashriiqa ,utuuro buuraha,Waxaa sunno ah in Tuurashada, Gowraca, Xiirashada iyo dhawaaful-ifaadaha sida aan usoo sheegnay loo kala hormarsho, laakiin waajib ma ahan sida ku cad Xadiiska Rasuulka (C.S.W) oo la weydiiyay maalintaas waxyaabaha lakala hormarshey uuna ku jawaabay: "Sameey, danbina korkaaga ma,ahaan

Xusuus: Xiirashada, dhawaaful-ifaadaha iyo Sacyiga haddii ay kaatagaan waqti kasta waa lala

imaan karaa inta aad nooshahay Haddii uu xaajiga sameeyo sedaxdaan kala ah: gamasho, xiirasha iyo dhawaaful-ifaada wuxuu helayaa taxallulul awal, oo waxaa u xalaal noqonya wax waliba oo ixraamka, dartii, xaaraam uga ahaay,inti aanka, aheyn Haweentiisa,oowutago,iyadoo,cibaadokale,usiid himantahay,sidagemashadabuuraha,sidaqofkadu kanayaba,loogadalbo,salaama, naqsilabaadisgoo, salaadiina uga baxay salaama naqsigii hore, inkastoo meeshaan oo ah xajka waxa laga rabo ay yihiin waajib, salaadana waxa laga rabo ay ahaayeen salaama naqsi labaad oo sunna ahaa Haddii uu sameeyo xaajigu kii sedaxaad oo u dhinnaa wuxuu helayaa taxallul-taani oo waxaa u xalaalah wax kasta oo ugu xaaraam ahaa ixraamka dartiis.xataa haweenkiisi. Haddii uu kasoo noqdo xaajigu dhawaaful-ifaadaha wuxuu baryayaa Muna labo habeen ama seddax habeen

sida ku cad Aayada 203 ee Suuratul Baqara. Baryidaan la baryayo Muno waa Waajib, qofkii ka tagana wuxuu dhiibayaa dhiig. Maalmaha 11-aad, 12-aad iyo 13-aad, waxay tuurayaan seddaxda buuroodba, waxayna ka bilaabayaan Kubraa, waxayna ku xijinyaan Wusdhaa, waxayna ku xijinayaan Jamratul-caqaba.Laakiin haddii uu doono Xaajiga inuu baxo Maalinka 12-aad wayubanaantahay sida ku cad aayada, laakiin waa inuu baxo intii aan qorraxdu dhicin, laakiin haddii qoraxdu ugu dhex dhacdo muno, waxaa ku waajibaayo inuu baryo habeenkaas, tuurana maalinta xigta buurihii sedaxda aha.waxaa loo suneeyaa Imaamka inuu khudbo u akhriyo xujeyda Muna dhexdeeda maalinta 10-aad, salaada duhur bacdigeed, khudbadaas oo uu ku baraayo axkaamta dhawaafka iyo tuurashada iyo xoola qalidda iyo baryidda muno, dabadeed, khudbo

labaad ayuu akhrinayaa maalinta labaad ee ayaamu tashriiqa, wuxuu ku akhrinayaa Muno salaadda duhur bacdigeed, taasoo uu ku baraayo iney banaantahay inay baxaan maalinta 12-aad iyo, Axkaaamta, dhawaaful-wadaaca, sida inuu, waajib yahay iyo in qofki, katago, dhiig, lagarabo iyo in haweenka dhiig qabo laga fududeeyay ,iyo qofki Inta, sameeyso dhawaaful wadaaca marko kudaahdo uguna daaho arimo aan aheeyn isu diyaaiska safarkiisa in markale lagarabo

**3. RUGNIGA SADAXAAD WAA SACYIGA**

**SHURUUDAHA SACYIGA**:

Waa in uu kabilaabo Safo kuna dhameeyo Marwo, waxaana daliil,u ah, inuu kabilaabayo Safo, xadiiska rasuuku (S.C.S) uu ku yiri, kabilaaba mida uu ALLE kabilaabay, oow, u lajeeday, safa, sida kucad, aayada ku jirta suuratul Baqara oo Lanbakeeduy 158 aad waana inuu

ordo xaajigu todobo mar inta u dhaxeyso safa iyo marwo markuu safo katago uuna tago marwo hal mar ayuu xisaabsanayaa markuu ka soo noqdo marwo uuna yimaado safo, iyadana markale ayuu ka xisaabsanayaa laakiin dawaafka waxaa la xisaabiyaa markasto oo aad timaado calaamada madow taasoo dhulka ku calaameesan oo ku aadan xajarul-aswadka oo xaga tirada waxaa sahlan sacyiga

**XUSUUS** Qofki asiga oo dhawaafayo lagu dul,aqimo wuu joojinayaa dhawaafka wuuna dukanayaa kadibna halkii ayuu kasiiwadanayaa,dhawaafkii,oosalaadu,magooyneyso dhawaafka

**XUSUUS**, Qofkii dawaaful quduumka kadib, sameysay. sacyi loogama baahno sacyi kale inuu dawaaful ifaadaha kadib sameyso sida dadka qaarkood sameeyaan

**XUSUUS Dawaafyadu waa afar**

1) Dawaaful quduum oo ah suno oona ah salaanta kacbada(beeytka) waana sida taxiyatul masjdka haddii lagatagana waxkama waajibayaan
2) Dawaafu rukni oo arkaanta kamid ah hadii laga tagana xajku uusan ansaxeeyn illaa oow kalayimaado dawaafkaas oona dhiig lagukabikarin
3) Dawaaful Wadaac oo ah waajib laguna qatimo acmaasha xajka hadii laga tagana waxaaku waajibaayo xaajiga dhiig inuu baxsho laakiin haweenka dhiig qabo waa lga fududeeyay (laga fasaxay)
4) Dawaaful cimro oo arkaanta cimrada kamid ah haddiii lagatagana cimradu aysan ansaxeeyn ilaa uukalayimaado

**SUNOOYINKA SACYIGA**:

Waxaa kamid ah inoow dahaaro qaato & inuu fuulo Safo iyo Marwo qadar istaagiisa la eg, hadii uu fuulo buurta wuu duceysanayaa, ducada kuqoran risaaladan meesha udanbeeyso waxaa

kaloo ka mid ah sunooyinka Sacyiga inuu socdo marka
hore,Iyomarkadambe:laakiindhexda,uuordo,weynacalaameysanyihiin meesha uu ka bilaabayo orodka iyo meesha uu ku joojinayo **LAAKIIN**,**HAWEENKUMARNA**,**MA**,**OR DAYAAN** .waxaa kale ookamid ah sunooyinka sacyiga inoo xariiraho sacyiga dhexdiisa &inoo xariirsho sacyiga & dhawaafka

**4.RUGNIGA AFARAAD WAA DAWAAFKA**:

Rugniga afraad waa dhawaaful ifaadaha ama dhawaaful rugni, waxuuna kamid yahay arkaanta sida ku cad ayaada 29 aad ee suuratul xaj dawaafka waxaa loo shardiyaa Dahaaro iyo cowrada in la asturo iyo in uu ku dhawaafo masjidul xaraamka dhexdiisa iyo in uu dhameystiro todobada dhawaaf iyo in uu ka bilaabo dhawaafkiisa

**XUSUUS**: **XAJARUL ASWADKA** waxaa laga keenay janada wuxuuna ka cadaa awal caanaha waxaa madoobeeyay dunuubta bani'aadamka sida ku cad xadiiska rasuulka S.C.W. uu warinayo bukhaari. hadii uu ka bilaabo meel aan aheyn Xajarul Aswadka loo xisaabi mayo, laakiin hadii uu ku yimaado Xajarul Aswadka ayuu tiro bilaabanayaa, waana in Beytku ama Kacbdu eey ka xigto dhinaciisabidix,waana,inuumarkuudhawaafayo,kabaxsanyahay,beeytka,waainuukabaxsanyahay,shaadirwaanka oo ahdhismaha catabadaoh(sookalkaah)waadhismogaaban oo ueg catabadaguryahalagatalaabsado beeytka ayuuna ku wareegsan yahay illaa xijruismaaciilmaaheefmaxaayeelaybeeytka ayuu ka mid yahay ooqureeeshmarkeey dhiseeysay,beeytkaayaaqarashkikugaabtay markaas ayeey katageen (Beydka iyo kacbadu waa isku mid,kacbo waxaa loogu baxshay afar

geesnimadeeda darteedaiyo kor ahaanteeda darted beydkuna waa beydkii ugu horeeyay ee loosoo dejiyay dhulka, sida ku cad aayada 96-aad ee suurada Aala Cimraan. Waxaana ku xigay beytul Maqdis.

**XUSUUS HAWEENKU hadii aysan daahir aheyn** dawaafka dib ayey u dhiganayaan oo waxey la imaanayaan hoowlaha kale ooaan dhahaarada loo shardin , Markey daahir noqto ayeey la imaanee dhawaafki Sida ku cad xadiiska Bukhaari oo ay Caa'isho laga warshay oo rasuulka kuyiri markii ay Caa'isho ay xeyshay ayadoo lajoogo waqtiga dawaafka kani waa arin alle u qoray gebdhaha bani'aadamka ee sameey wixii xaajigu sameynayo aan ka ahayn dawaafka intii aa daahir ka noqoneysid.

**WAQTIGA,DHAWAAFULIFAADA**

DHAWAAFULIFAADAAHA:waqtigiisu:wuxu u kabilaawdaa habeenka tobanaad kala barkiisa waxuuna baaqi yahay ilaa qofka cimrigiisa

## XUSUUS

## WAQTIGA GARABKALADABOOLAYO

Xaajigu marka uu dhameeyo dawaafka garabkiisa midigta ah ha daboolo,eema,aha inuu markasto garabkiisu iska banaanyahay sida dad badan ay yeelaan  Dhawaafyadu waa sadax dhawaaful rugni oo ah rugni lana sameeyo tobonaadka iyo wixii ka danbeeyo. dhawaaful quduum oo ah suno oo la sameeyo marka aad kacbada  soo galeysid maalinta sideedaad badanaa waana salaanta buqcada (kacbada)ee ma,aha mid sidiisa looguqasdo waana sida taxiyatul masjidka

(مغني المحتاج في الجزءالأول رقم 510)

Iyo dhawaaful wadaac oo ah waajib una danbeeyo acmaasha xajka laqabanaayo.

## 5.RUGNIGASHANAA

## WAAXIIRASHSDA

## AMAGAABSASHADA

Xiirashada xaajiga Waqtigeedu wuxuu galayaa habeenka tobanaad kalabarkiisa

Raga waxaa u fadlibadan xiirashada sida ku cad aayada 27-aad ee suuratul Fatxi iyo xadiiska rasuuka uu uduceeyay kuwa xiiranayo 3 mar, markii afaraadna uu u duceeyay kuwa gaabsanyaan. Haweenku markasta way gaabsanayaan. Gaabsashda waxaa ugu yar sadex tin nin ama naagba qofkii sadex tin waxkayar gaabsado waxaa kuwaajibaayo fidyo laakiin qofka cimreeysanaayo wxaa u fiican inoo gaabsado tinta si,marka uuxajinayo tinta uxiirto

Xusuus Gamashada, gowraca iyo xiirasha da in sidaan la,isugu xijiyo ayaa fiicantahay laakiin waajib ma ahan

لقوله صلى الله عليه وسلم (إفعلْ ولاحرج)

waxaana lagu soo gaabiyaa sidaeey ukalahoreeyso(RADAXA) oo ah Ramyi, Dabxi iyo Xalqi

Xusuus: أفعال يوم النحر أربعة

hoowlaha maalinka tobanaad waa afar Tuurasho,goowrac,xiirasho,amagaabsashodawaa fu rugni ama dawaaful ifaada

**RUGNIGA LIXAAD WAA TARTIIBTA ARKAANTA BADANKEEDA**

**الترتيبُ وضعُ كلِّ شيءٍ في مرتبتِهِ.**

وقد قال صلى الله عليه وسلم خُذُوْاعَنِّيْ مناسِكَكُم

Tartiib waxaa layiraa in shayga loo sameeyo siduu ukala horreeyo, hadaba xaajigu waa inuu, ixraam macal niyo ah u horreeysiiyo,وkanahorreeysiiyo,dhawaa'ulifaadaha, iyo xiirashada amagaabsahada, laakiin xiirashada iyo dhwaafku, tartiib malaha oo midki la rabto ayaala hormarikaraa wuquufka carafana wa inuukahoreeyo xiirashada iyo dhaaful ifaadaha laakiin xiirashada &dhawaaful ifaadaha midki larabo ayaa lahormari karaa

## XIIRASHADA WAQTIGEEDA

wuxuu gelayaa habiinka tobanaad kalabarkiisa

## SUNOOYINKA DHAWAAFKA

Waa inuu dawaafo asagoo kabo la'aan ah, waa in uu salamsado (taabto) Xajarul Aswadka dhawaafka ugu horeeya uuna dhunkoodo uuna wajigiisa dul saaro Xajarul Aswadka. Hadii ay u suuroobeyso., hadii uusan awoodina waxa uu ku ishaarayaa gacantiisa ama ul, laakiin ma dhunkoodu xaajigu Rugniyeynka Shaamiyeenka ah mana salamsado (mana taabto)laakiin wuxuusalamsadaa (taabtaa) rugniga Yamaaniga laakiin ma dhunkoodo.Waxaa kaloo suno ah inuu rucleeyo (ordo) saddex mar ee ugu horreeyo dhawaafka laakiin laba rukni inta udhaxeeyso ma ordayo afarta mar ee soo hertana wuu soconayaa xaajigu lama amrin xujeeyda ineey todobada mar ordain naxariis loo naxariisanaayo darteed orodkaas waxuu qaas ku yahay dawaaf uu la cirbinayo sacyi ee ma aha in

xaajigu markasta orodkaas sameeyo sida dadku u badanyihiin, waxaa kaloo suno ah in xaajigu Jino tuuro;

**XUSUUS JINA TUURKU WUXUU KHAAS KUYAHAY** dawaafka uu orodka ku dhex sameynaayo ee ma aha in xaajigu dhawaaf kasto jina tuuro sida dadku u badanyihiin, jina tuurku waxaa waaye inuu xaajigu maradiisa kala barkeed uu yeelo garabkiisa midigta ah hoostiisa, labada dhinac oo kalana uu yeelo garabkiisa bidixda ah,

**HAWEENKU**,**MARNABAMA JINATUURAYAAN MANAGULFIAYAAN** (marucleeynayaan)

Dhawaafka sunooyinkiisa waxaa ka mid ah inuu xiriirsho todobada mar, waxaa kaloo ka mid ah sunooyinka dhawaafka inuu dhawaafka ka bacdi uu labo rakco ku tukado Maqaamu Ibraahiimka, rakcada hore wuxuu ku aqrinayaa "Suuratul Kaafiruun" rakcada labaadna wxuu ku aqrinayaa

"Suuratul Ikhlaas". Kadib wuxuu cabayaa biyaha Zamzamka wuuna ka feera buuxsanayaa oo wuu ka dhergayaa wuuna duceysanayaa oo wuxuu ku duceysanayaa wuxuu jecelyahay aduun iyo aakhiraba.

## ARKAANTA CIMRADU WAA AFAR

Haddi niyadalagu darana waa shan waana arkaanti xajka aan ka eheeyn wuquufka carafe oo cimradu waxeey ku egtahay markuu xarmado uuna xirto cimrada dawaafana dawaaful cimro

sacyinalayimaado,.xalqi(xiirasho.amagaabsasho uusameeyo halkaas ayeey ku egtahay,cimradu

1. Xarmasho, soomaalidu waxay ka soo xarmanee YALAMLAM
2. dhawaaf
3. xiirasho ama gaabsasho
4. sacyi

## WAAJIBAADKA, XAJKU WAA SADDAX

Haddiilagudaro xiirashda ama gaabsashadana waa afar laakiin annagu arkaanta ayaankusoodarnay waana sida raajixa ah

WAAJIBKA KOOBAAD waa in laga soo xarmado miiqaat

Miiqaatka soomaalidu waayalamlam.

**QOFKI**,mako degen,miiqaadkiisu,waagurigiisa ama xijri ismssciil **Sidoo kale** qofki safar kuyimaado mako joogana mako uguyaraan afar maalin aysan kujirin maalinki uu mako soogalay iyo maalinka ookabaxayo 264 مغني المحتاج في الجزءالأول رقمwuxuu kamid yahay reer mako oo wuxuu kaxarmanayaa mako laakiin cumrada waxeey ubaxayaan xilliga (adnalxilli) sida tanciim oo kale

**Miiqaatku wuxuu u kala baxaa labo**. Miiqaat zamaani ah iyo miiqaat makaani ah miiqaatka zamaaniga ah ee xajka waa bilaha sonfur, sidataal iyo tobanka hore ee bisha carafo sida kucad ayaada 197aad ee suuratul BAQARA laakiin

cimrada sanadka oo dhan waa la cimraysankaraa. Miiqaatka makaanig ah waa shan qofka degan Mako waxa uu kaxarmanayaa Mako lafteeda laakiin Qofkii aan Mako deganeen hadii uu kayimaado Madiino wuxuu xarmanayaa DUL-XULEEFA oo hadda loo yaqaano RAABUQ qofkii ka yamiyaada Masar ama Magrib (marooko) iyo Shaam waxay kaxarmanee JUXFA Qofka kayimaada Yaman iyo Soomaaliya wuxuu ka xarmanayaa YALAMLAM Qofka ka yimaada Najdil-xijaaz iyo Najdul-yaman wuxuu ka xarmanaa QARNAN qofka kaymaada Bari wuxuu ka xarmanaa DAATU-CIRQIN.

## WAAJIBKA LABAAD waa gamashada buuraha

tuurashada buuraha maalinta tobonaad xujaaydu waxay ka soo tagayaan MUSDALIFA markeey salaada subax dukadaan laakiin dadka tabarta yar waxaa loofasaxay iney soobaxan habeenka kalabarkii (lix saac habeenimo) soona aadaan MUNA si, ey u tuurtaan buurta, xujeeydu waxay gamayaan (**Jamratul kubraa**) waana midda soo xigto Masjidul-kheyf. Oo ugu sokeeyso marki aad katimaado Musdalifa xageeda uguna xageeyso oo xigto Mako xageeda Maalintaas tobonaad, halkaas buur uunbaa tuureeysaa ,waqtigeeduna wuxuu gelayaa habeenka tobanaad kala barkiisa laakiin maalmaha kale ee ayaamu tashriiqa tuurashada waqtigeedu wuxuu gelayaa waqtiga duhurka markaas ayeeyna TALBIYDA, gooynayaan

لحديث لم يزل النّبيّ صلى الله عليه وسلّم يُلَبِّيْ حتى رمى جمرة العقبة رواه البخاري

Waxaana lagu badalaaa takbiir

Laakiin muctamirku waxuu talbiyada gooynayaa markuu dhawaafka bilaabayo

مغني المحتاج في الجزءالأول رقم 501

xusuus xujaaydu takbiirta waxay bilaabayaan maalinta tobanaad markeey ka xalaal noqdaan ixraamkooda (taxalulal,awalka)

**GAMIDA WAQTIGEEDU**, wuxuu ku egyahay, maalinka ugu danbeeyo, ayaa mutashriiqa qorraxdiisu dhacdo, Qofki gamitaanku katago, wuu soo qaleeynayaa, haddii uu sooqalleyn waayana waxaa ku waajibaayo fidyo, oo ah inuu dhiig baxsho

xusuus Dawaafka iyo sacyiga dhexdiisa xaajigu kuma talbiyeesto ee adkaar kale ayuu, la imaanayaa oo ku qoran risaaladaan aakhirkeeda todobo dhagax ayena gamayaan xujaaydu maal-maha kalane sadaxda buurba way gamaayaan oo kala KUBRAA ama (JAMRATUL CAQABA)WUSDHAA,JAMRATUL, AKHIIRA laakiin maalinta koowaad waxaa gamida bilaabi kartaa laga bilaabo habeenka tobonaad kala barkiisa lakiin maalmaha kale tuurista waxay bilaabanee waqtiga duhurka waxaadna leedahay markaad gameyso buuraha Allahu Akbar,Waxaa suno ah inuu duceysto xaajigu markuu tuurtayo buurta 1-aad iyo tan 2-aad.ba asagoo qiblada qaabilsan gacmihiisana kor u qaadayo laakiin buurta u danbeyso ee jamratul caqaba ma istaagayo mana duceysanahayo sida kucad xadiiska rasuulka S.C.W Haddii ay kaatagto halmaalin gamashadeed,waxaad, la

imaanaysaa, ayaamu-tashriiqa dhexdiisa, laakiin haddaad la imaanwayso ayaamu-tashriiq dhexdiisa kadib makaa ansaxayso,tuuridu waxaana kugu waajibayo dhiig inaad bixixo

**xusuus** Qofkii rabo, inuu buuraha, u tuuro qof aanturan Karin waxaa shardi ah in uu markahore naftiisa katuuro

**xusuus** maalinka tobanaad halbuur uunbuu tuurayaa Hadduu buurta uu tuuro maalinka tobanaad wuxuu qalayaa xoolih hadduu mutamatic ama qiraan yahay dabaded wuu xiiranayaa ama wuu gaabsanayaa kadibna wuxuu aadayaa Mako si uu dawaaful ifaado ama dawaafu rukni ulayimaado sidaan ineey iskuxigaan ayaa fiican laakiin haduu kala

hormarsho wax dhib ah malaha
لقوله صلى الله عليه وسلم (إفعلْ ولاحرج

**Waajibka saddaxaad waa Dhawaaful wadaac**.

Dhawaaful wadaacu waa waajib waana in xaajiga dhawaafo kacbada markuu dhameesto howlaha xajka laakiin lagama rabo sacyi. Qofki ka tagto Dawaaful wadaaca waxaa laga rabaa dhiig. Laakiin hadii uu kasoo noqdo meel la eg masaafatul qasri ama ka yar wuu ka dhacayaa dhiiggu. Laakiin haweenayda xaa'ida ah waxaa u bannaan inay iska baxdo wadaac la'aan, sida ku cad xadiiska rasuulka (C.W.S) ay warineyso Caa'isho in Safiyo oo kamid ah haweenka rasuulka C.S.W ay xeeshay markii la baxayay dabadeedna rasuulka uu kuyiri maalintii tobanaad,dhawaafki,ahaa,dawaafurugniga,masa

meysay,dabadeedna layiri waay sameysay kadibna uuu yiri iska bax.

**Xusuus** Haddi uu xaajigu bixi waayo dhawaaful wadaaca bacdigiis uuna udaaho arimo oon kusaabsaneen anbabaxa safarkiisa wuu soo celinayaa dhawaaful,wadaaca haddii uusoocelinwaayana dhiig ayaa laga rabaa laakiin haweenka dhiiga qabo waqtigaas ayga,waa laga fasaxay dawaafulwadaaca sidaku cad xadiiski hadda aan soosheegnay

**xusuus**:

**FARQIGA U DHAXEEYO RUGNIGA, WAAJIBKA IYO SUNO**

Rugni hadii aad ka tagto xajka ama cimradu ma'arnsaxayaan ilaa aad kala timaadid rugnigaas laakiin waajib hadii aad ka tagto waxaa kugu waa jib ah dhiig ama soon, SUNO hadii aad ka tagto waxba kuguma waajibin.katagidaas darteed

## SUNOOYINKA XAJKA WAA LIX

1) Ifraad oo ah in lakali yeelo xajka.

2) Talbiyo oo ah labayka lahuma labayka. 3) dhawaaful Quduum.

4)in lahoydoMuzdalafa.

Xusuus Dhagaxda wax lagu tuurayo in muztalafa laga Gurubsado waajib ma,ah n ee meel kasta ayaa laga gurubsan karaa

5) In lahoydo Muno. 6) In laba ragco lagudukado Maqaamu-ibraahiimka.

WAXYAALAHA IXRAAMKA DARTIISA XAARAAMKU AH WAA TOBAN

1. in-ninku xirto dhar ay tolmo gashay. Laakiin haweenku way xiran karaan
2. in-ninku madaxa uu daboolo iyo in haweenku wajiga ay daboolaan
3. in-tinta lashaleeyo
4. in-tinta laxiiro aydoon waqtigeedi lagaarin

5. in-cijiyaha lajaro aydoon waqtigeeda lagaarin
6. barafuun ama shey carafaya aydoon waqtigeeda lagaarin aad marsato Laakiin dhib maLaha baruun aad marsatay intaadan Ixraaman haduu kugu baaqi noqdo(kaasoo carfo)

7. مغني المحتاج في الجزءالأول رقم 479

7.in-ugaar ladilo

8. in-naag uunikaasado naftiisa ama qof kale unikaaxiyo iyo in xataa Loowakiisho nikaaxeeda waana ijmaac arikaasu Hadduu sameeyo nikaaxaasna.maguntamaayo,'laakin xajkuna,ugafasahaadimaayo,laakiin xajka waxaa fasahaadinaayo xaaska oolootago inta aan lagaarin taxalulul awal waxaana kuwaajibaayo fidyo oo ah neef geel ah ama neef lo,ah ama todoba neef oo ari ah iyo

inoow sii wado Xajki asagoo fasaaday iyo inoow sanadka danbe soo qaleeyo xataa haduu kii hore suno ahaay,laakiin naagta loo tagay waxba kuma waajibin jimaaci dartii

9. in-haweentiisa uu utago

10 inuu taa-taabto haweentiisa si shahwo ah Intaa wax kamid ah haduu sameeyo xaajigu waxaa ku waa jibaayo fidyo oo ah inuu dhiig baxsho haduusan awoodinna uu soomo laakiin haweenta oo loo tago asagoon helin taxalulu saani xajka ayaaa ku burayo waxaana udaliil ah aayada 197 aad ee suuratul baqara uu allakuyiri rafas maya fisqi maya doodna maya waana khabar bimacnaa nahyi ah waxaana ku waajib noqeyso inuu sii wado xajki asigoo buray iyo sanadka xigo inuu soo xajiyo waxaana udaliil ah aayada 196 aad ee suuratul baqara uu allakuyiri xajka &cimrada taamyeela lamana kala saarin xajka saxiixa ah &xajka

faasidka ah waana amar nala duldhigay cimraduna waxay kuburee haddii uu,u tago xaaskiisa asgaoo aan dhameyn acmaashii cimrada

Xusuus:Laakiin haweenta loogutag ayada xajka dhexdiisa dhiig,ineey bixiso kuma waajibin (baajuuri nanbar 335)

**Xusuus**: Qofkii waagu uguberyo maalinka tobanaad asigoon tagin carafo xaj uma jiryo waxaana ku waajibayo inoow acmaasha cumrada la yimaado sanadka danbana uu soo qalleeyo xajki katagay waxaana kale oo kuwaajibaayo neef ari ah inuu goowraco:

لحديث الحجُّ عرفة أي مُعْظَمُهُ

**Xusuus** Haddii qof xaj ama cimro xarman lashiro lamanciyo (loodiido) inuu siiwato acmaashiisa haddii uu helikaro wadokale waxaakuwaajiba inuu wado kale qaado haddii kale waxaa ubanaan inuu iska taxalusho kadibna

waxaa ubanaan waxyaalihii ixraamka dartii uga xaaraan ahaay kadibna wuxuu goowracayaa neef ari ah wuxuuna ku goowracayaa meeshi lagu shiray (lagucelshay) wuxuuna siinayaa masaakiinta xaramka joogto haddii uusan heli karina wuu soomayaa sida kucad aayada 196 aad ee suuratul baqara wuuna xalaal noqday oo waxyaalihii ixraamka dartii uga xaaraan ahaay ayaa ubanaan sida dharka oow iska badelo barafuun ama wax carfaayo uu marsado haweentiisa uu utago I.w.m

Su,aal

Haduu ixraamki ka xalloolnoqdo xajkii laga shirana uu ahaay waajib masoo qaleeynayaa?

Jawaab Imaamu shaaafici laba qool ayuu kuleeyahay kan raajixa ahna waa in lasoo qaleeynayo q00wlka kale wuxuu leeyahay lama sooqaleeynayo maxaa yeelay wuu huray tabartiisi 329 الباجوري رقم Imaamu abuuxaniifa yo

Imaamu maalik iyo Imaamu axmad waxeey dhaheen lama soo qaleeynayo

رحمة الأمة في إختلاف الأئمة 112

**XUSUUS**. BAADIDA,XARAMKALAGAHELO qofna u ma banaano ineey milkiso bal waa inaad geeyso meelaha loogutalagalay oo dowladu udiyaarisay in laga baafiyo xusuus sidoo kale mabanaano in ladilo ugaarta xaramka joogto ha ahaato qooleey ama ugaar kale qofki dilana waxaa ku waaajib ah ineey bixiso neef u, eg, ugaarki oowdily, sida kucad aayada 95aad ee suuratul maa,ida:Hadii uusan laheeyn ugaarki ladilay:neef ueg suurada (xagga muuqaalka) xoolahawuxuu bixinayaa raajin laeg qiimihi ugaarki uu dilay ama wuu soomayaa soom laeg raashinki uubixi waayay inta koonbo uunuqday sidookale mabanaano inlagooyo geedaha xaramka

Xusuus Qofki asigoo xaj xarman dhinto waa ladhaqayaa waana lagu dukanayaa waana lakafaninayaa waana laduugayaa laakiin madaxa lagama daboolayo haduu ninyahy haween haduu yahayna wajiga lagama daboolayo waxaana udaliil ah xadiiska bukhaari &muslim ay warinayaan oo ahaa in nin muxrim ah ratigiisi uusaaraay uu riday dabadeedna uudhintay dabadeedna rasuulku C.S.W. uuyiri madixiisa hadaboolina udugna hamarina waxaa lasoosaarayaa Qiyaamaha asigoo Talbiyeeysanaayee

**Xusuus**

Xaajiga waxaa loo suneeyaa inuu cabo biyaha Zamzamka, waxaana sunno ah in isagoo taagan cabo iyo inuu ka dhergo iyo inuu niyaysto wuxuu jecelyahay oo kheyr ah adduun iyo aakhiraba.

# Ziyaarada, QabrigaRasuulka (C.S.W)



المسجد النبوي والقبة الخضراء فوق قبر النبي محمد

Xaajiga waxaa loo suneeyaa markuu guto acmaasha xajka amaba ka horba inuu soo Ziyaarto Qabriga Rasuulka (C.S.W).

Xusuus:Ziyaarada qabriga Rasuulka (C.S.W.) kama mid aha Xajka balse waa Shey Sunno ah. Qabriga Rasuulka (C.S.W) wuxuu ku yaallaa Madiina, Xajkana waxaa lagu gutaa Mako.

Aadaabta Ziyaarta waa: Inuu yiraahdo Assalaamu caleyka yaa rasuula-laahi (C.S.W), codkiisa kor uma qaado, oo wuxuu edebsanayaa sida Rasuulka oo nool oo kale. Kadib, midigta ayuu

u baxayaa qaddar hal dhudhun ah, wuxuuna salaamayaa Sayid Abuubakar (R.C), kadibna, dib ayuu u baxayaa qaddar hal dhudhun ah, wuxuuna salaamayaa Sayid Cumar (R.C).

Waxaa kale oo loo sunneeyaa xaajiga inuu soo ziyaarto qabuuraha Baqiic oo Asxaab badan ay ku duuganyihiin, wuxuu kaloo soo ziyaaranayaa Masjidka Quba, waxaa kaloo sunno ah inuu tago Ceel Ariis uuna ka cabo biyo kana weyso qaato, waxaa kaloo haboon inuu salaadaha ku dukado masjidka Nabiga (C.S.W).

## DIGNIIN تحذير

Xaajiga haka digtoonaado inuu dawaafo qabriga rasuulka, waxaa kaloo reeban inuu ku dukado xijrada ama Qolka Rasuulka ku duuganyahay asigoo ula jeedo weyneyn. Waxaa kaloo reeban, in Xaajiga dhabarkiisa ku tiirsho derbiga Qabriga, waxaa kaloo reeban, inuu masaxdo qabriga, sidoo kale, waxaa reeban inuu dhunkado, balse, aadaabtu waxay tahay inuu ka fogaado qabriga uuna u jirsado intii asxaabtu u jiri jirtay markuu noolaa. Waxaa kaloo loo suneeyaa xaajiga haddii uu safraayo inuu masjidka ku sagootiyo labo rakaco oo sunno ah. Sidoo kale, waxaa loo suneeyaa inuu qabriga mar labaad tago uuna la yimaado salaantii oo **kale**, **wuxuuna dhahayaa "Ilaahayow haka dhigin ziyaaradeyda oo tan ah tii ugu danbeysay oo aan soo ziyaarto qabriga** Rasuulk, Ilaahayow ii celi wadankeyga anoo nabad qaba".

وإذا رأى البيت رفع يديه ويقول: "اللهم زد هذا البيت تشريفاً وتكريماً وتعظيماً ومهابةً، وزد من شرّفه وعظّمه ممن حجه واعتمره تشريفاً وتكريماً وتعظيما وبراً، اللهم أنت السلام ومنك السلام فحينا ربنا بالسلام" ويدعو بما أحبّ من الدين والدنيا.ويقول في طوافه عند البيت: "اللهم إن هذا البيت بيتك، والحرم حرمك، والأمن أمنك، وهذا مقام العائذ بك من النار".

ويُسنّ أن يقول أول طوافه : "بسم الله والله أكبر، اللهم إيماناً بك وتصديقاً بكتابك، ووفاءً بعهدك، واتباعاً لسنة نبيك محمد صلى الله عليه وسلم".

ويقول بين اليمانيين : "اللهم آتنا في الدنيا حسنة وفي الآخرة حسنة وقنا عذاب النار". فإذا وصل إلى الركن الذي عند فتحة الحِجْرِ يقول: "اللهم إني أعوذ بك من الشك والشر والشقاق والنفاق وسوء الأخلاق وسوء المنقلب في المال والأهل والولد".ويقول قبالة الميزاب: "اللهم أظلني في ظلك يوم لا ظلَّ إلا ظلُّكَ، وأسقني بكأس نبيك محمد صلى الله عليه وسلم مشربا هنيئا لا أظمأ بعده أبداً".

ويقول بين الركن الثالث واليماني: "اللَّهم اجعله حجاً مبروراً وسعياً وعملا مقبولا وتجارة لن تبور يا عزيزُ يا غفورُ".

ويقول في رمله أي في الثلاثة الأولى: "اللهم اجعله حجاً مبروراً وسعيا مشكوراً وذنبا مغفورا".

ويقول في الأربعة الباقية: "رب اغفرْ وارحمْ واعفُ عما تعلمُ إنك أنتَ الأعزُّ والأكْرَمُ، ربنا آتنا في الدنيا حسنة وفي الآخرة حسنة وقنا عذاب النار"

## دعاء يوم عرفة: ducada yoomka carafo

وفي الحديث (خيرُ الدعاء دعاءُ يومِ عرفةَ، وخيرُ ماقلتُ أنا والنبيون من قبلي " لاإله إلا الله وحده لا شريك له له الملك وله الحمد وهو على كل شيء قدير". ويقول :اللهم اجعل في قلبي نورا وفي سمعي نورا وفي بصري نورا اللهم اشرح لي صدري ويسِّرْ لي أمري ربنا آتنا في الدنيا حسنة وفي الآخرة حسنة وقنا عذاب النار. اللهم إني ظلمتُ نفسي ظلماً كثيراً ولا يغفر الذنوب إلا أنت فاغفر لي مغفرة من عند وارحمني إنك أنت الغفور الرحيم. الَّلهم انقلني من ذلّ المعصية إلى عزّة الطاعة، واكفني عن حرامك، واغنني بفضلك عمن سواك، ونوّر قلبي وقبري، واهدني وأعذني من الشرّ كله، واجمع لي الخير.

اللهم إني أسألك الهُدَىْ والتُّقَىْ والعَفَافَ والغِنَىْ".

وينبغي أن يستغفر للمؤمنين والمؤمنات في دعائه في يوم عرفة، ويكثر البكاء، لأن هناك تسكب العبرات، وتقال العثرات.

**ملاحظة:** الصّعود على جبل الرّحمة ليس له فضيلةٌ زائدةٌ

دعاء الصفا إذا رقاها يقول "الله أكبر، الله أكبر، الله أكبر ولله الحمد، الله أكبر على ما هدانا والحمد لله على ما أولانا لا إله إلا الله وحده لا شريك له، له الملك وله الحمد يحيي ويميت وهو على كل شيءٍ قدير، لا إله إلا الله وحده صدق وعده ونصر عبده وأعز جنده وهزم الأحزاب وحده ، لا إله إلا الله الله أكبر ولا نعبد إلا إياه مخلصين له الدين ولوكره الكافرون ، ثم يدعو بما شاء من خيري الدنيا والآخرة.تنبيه: ولا يقبّل شيئاً من البيت إلا الحجر الأسود، ولا يستلم شيئاً إلا اليماني

**DARDAARAN** **وصيـة**

Qofkasto oo hesho nusqo kamid ah risaaladaan waxaan ka codsanaa in ay ii soo duceyso markay tagto amaakiinta fadliga badan leh iyo in ay sii badiso risaaladaan si ay xujayda sanad kasto uga faa'iidaysato.

Waxaa Diyaariyay: Sh.Ibraahiim Max'ud Jiisoo

w **TELL**::**615591213**

**تأليف الشيخ إبراهيم محمود جيْسَوالصومالي المقدشي**

حقوق الطبع محفوظة للمؤلِّف

## ومن مؤلّفات الشيخ جيسو

1)علوم القرآن
2) إعانة المبْتَدِئين لعلم الفرائض على سبيل الاسئلة والاجابة
3) المعتمد لقاعدة الصّرفية في لامية الأفعال لجمال الدّين
4) المعتمد لإعراب أمثلة الأجْرُومية طبعة الأولى
5) المعتمد لإعراب أمثلة الأجْرُومية طبعة الثانية
6) المعتمد لإعراب متن الأجرومية
7) خُطْبَةُ الجُمْعَةِ اتلفِقْهِيةِ
8) تعليم الطّالب من دينه على سبيل الاسئلة والاجابة
9) رسالة الصّلاة على سبيل الاسئلة والاجابة
10) رسالة الزّكاة على سبيل الاسئلة والاجابة
11) رسالة الصّوم على سبيل الاسئلة والاجابة
12) رسالة الحجّ والعمرة باللّغة العربيّة على سبيل الاسئلة والاجابة
13) دليل الحجّ والعمرة باللّغة الصّومالية
14) رسالة الحجّ والعمرة باللّغة العربية وباللّغة الصّومالية
15) رسالات العبادات الاربعة على سبيل الاسئلة والاجابة